# Storybooks Canada

storybookscanada.ca

## Maalintii aan ka tagay guriga een magalada aaday

Written by: Lesley Koyi, Ursula Nafula
Illustrated by: Brian Wambi
Translated by: Abdi Muse

This story originates from the African Storybook (africanstorybook.org) and is brought to you by Storybooks Canada in an effort to provide children's stories in Canada's many languages.

This work is licensed under a Creative Commons Attribution 4.0 International License.
https://creativecommons.org/licenses/by/4.0

# Maalintii aan ka tagay guriga een magalada aaday




Lesley Koyi, Ursula Nafula
Brian Wambi
Abdi Muse
Somali
Level 3




Boosteejada yar ee tuuladeyna waxa ay aheyd mid mashquulsan dadka awgeed iyo bases la rar dhaafiyay. Dhulka xitaa waxaa yaalay wax badan oo in la raro aheyd. Kirishbooyada ayaa ku dhawaaqayay magacyada meelaha ay basaskooda u socdaan.




“Magaalada, Magaalada, Waxuu u socdaa Galbeedka!” Ayaan maqalay kirishbooy ku dhawaaqaya. Kaasi ayaa ahaa baskii aan u baahnaa in aan raaco.




Baska magaalada ku dhawaad wuu buuxay, laakiin dad badan ayaa wali isku soo riixaayay in ay in koraan. Qaar baa xamuuulkoodi baska hoostiisa gashaday. Qaar kalena waxay dhigteen mesha kabaha lasaaranayay.





Baski soo noqonayay ayaa si dhakhso ah u buuxsamaayay. Dkahkso waxuu ku laaban doonaa bariga. Hada waxa iigu muhiimsan waxay ahayd inaan bilaabo raadinta guriga adeerkay.




Sagaal saacadood kaddib, waxaan ku toosay buuq weyn iyo wicitanka rakaabkii ku noqonaayay tuuladayda. Waxaan soo qaatay bacdaydi yarayd waana ka boodey baskii.





Rakaabka cusub ayaa ruxaayay tikidhadooda markay raadinaayeen meel ay ka fariistaan baska dadku ku badan yihiin. Dumarka haysta caruurta yaryar waxay ku raaxaysan hayeen safar ka dheer.



Waxaan is ku nabay xaga xigto daaqada. Qofka fadhiyay agtayda waxuu si adag u hayay bac cagaaran. Wuxuu soo xidhay kabo duug ah, jaakad dildilaacsan, wuxuuna u muuqday mid aad u xanaaqsan.





Markan jidka sii soconay waxaan sii xifdiyay magaca meesha uu adeerkey kaga noolaa magaalada weyn. Waxaan wali si hoose u sii shekeysan hayay markii aan hurday.



Laakiin maskaxdayda ayaa dib ugu laabatay guriga. Hooyaday miyay amaan ahan doontaa? Miyuu bakaylahaygu ii gali doona wax lacag ah? Walaalkay miyuu xusuusan doonaa in uu geedahaygi waraabiyo?





Waxaan fiiriyey banaanka baska oo waxaan ogaaday inaan ka tagaayo tuuladayda, meeshii aan ku koray. Waxaan u socday magaalada weyn.



Raritaankii ayaa la dhameeyey, rakaabkii oo dhanne waa la fadhiisiyay. Wareejiya yaashii wali waxay is ku soo riixahayeen baska si ay oga iibiyaan alaabadooda rakaabka. Qof kasta wuxuu ku qaylinayay magacyada waxa loo diyaariyey iibka. Ereyada ayaa iila muuqday kuwo cajiib ah.





Intii safarka sii gudo galnay, gudaha baska ayaa aad u kululaaday. Waxaan is ku xidhay indhaha anigoo rajeynayo in aan seexdo.



Sidaas tuu baska uga dhaqaaqay boosteejada baska, waxaan daaqada ka eegay bananka. Waxaan si la yaableh uga fikiray in aan abid kuso laaban doonto tuulada.





Rakaab yar ayaa iibsaday cabitaan, qaar kalena waxay iibsadeen cunto fudud oo yar yar waxayna bilaabeen inay calaliyaan. Kuwa aan haysan lacag, sida aniga oo kale, way daawanaayeen.



Hawlahani waxaa kala gooyay baska hoonkisa, calaamad muujinayso in aan diyaar u nahay inaan baxno. Rakaabiyihii wuxuu ku qayliyay wareejiya yaashii si ay baska uga dagaan.





Wareejiya yaashii ayaa isku riixay si ay uga dagaan baska. Qaarkood waxay sii yeen baaqigoda rakaabkii. Kuwa kale waxay sameeyeen daqiiqadkii ugu dambeeyey ee iibinta alaabooyin badan.